Iyada oo aannu la kaashaneyno qoysaska iyo Komuyuunatiyaashooda, waxaannu u doodnaa ammaanka, iyo joogteynta iyo fayo-qabka ilmo kasta oo aannu u adeegno si sharfeysa qoyska iyo dhaqanka iyo caadada.

Franklin County
Children
Services
(Xafiiska Adeegyada

855 West Mound Street
Columbus, Ohio 43223-2208
614.275.2571
614.275.2755 (faakis)
www.co.franklin.oh.us/children_services/

"Caruurta oo la Badbaadiyo Iyada Oo la Xoojinayo Qoysaska."

Waxa daabacay Xafiiska Adeegyada Ilmaha ee Franklin County
Xafiiska Xuquuqda Macmiilka

Franklin County Children Services
Protecting Children by Strengthening Families

Xuquuqda & Macluumaadka Macmiilka

Magaca Shaqaalaha Kiiska iyo Goobta:

_____

Kormeeraha:

_____

Kaaliye Agaasime:

_____

Agaasime:

_____

Goobaha Xafiiska:

Xafiiska Aqbalaadda	.....	4071 E. Main St.	.....	614.229.7100
Xafiiska Bariga	.....	4071 E. Main St.	.....	614.421.5500
Xafiiska Bariga	.....	4071 E. Main St.	.....	614.575.3500
Xafiiska Galbeedka	.....	1919 Frank Rd.	.....	614.278.5800
Waaxda Qaadasho-korinta Ilmaha (Adoptions Dept.)	.....	855 W. Mound St.	.....	614.341.6000
Waaxda Tababarka	.....	855 W. Mound St.	.....	614.278.5906
Xafiiska Shaqaalaha	.....	855 W. Mound St.	.....	614.351.2000
Xafiiska Xuquuqda Macmiilka	.....	855 W. Mound St.	.....	614.275.2621

Xafiisyada Maamulka:
855 West Mound St.
Columbus, OH 43223
614.275.2571

KHADKA TELEFOONKA FURAN 24-SAAC
614-229-7000

Iyada oo aannu la kaashaneyno qoysaska iyo komuyuunatiyaashooda, waxaannu u doodnaa ammaanka iyo jiritaanka iyo fayo-qabka ilmo kasta oo aannu u adeegno si sharfeysa qoyska iyo dhaqanka iyo caadada.

Xasuus-qorro

Weer ku saabsan buug-yarahan

Siyaasaddayadu waxa ay tahay in aannu adiga ku siinno buug-yarahan oo aynu ka wada hadalno marka ugu horreysa ee uu mid ka mid ah shaqaalahayaga kiisasku uu wareysi fool-ka-fool ah adiga ku la yeesho. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, fadlan waxaad wacdaa shaqaalahaaga kiiska ama kormeeraha ku liis-gareysan bogga sare ee buug-yaraha. Haddii kiiskaaga la furay oo loo diray mid ka mid ah xafiisyada gobolada, shaqaalahaaga kiiska ee cusubi wuxuu hubin doonaa in adigu aad heysato nuqul buug-yarahan ah oo ay ku yaallaan magacyada kormeeraha iyo shaqaalaha kiiska ee cusub.

Weer ku saabsan xaqa aad u leedahay inaad si karti leh wax u sheegatid

Dhammaan shakhsiyaadka aan awoodda u laheyn inay Af Ingiriisiga wax ku sheegtaan hadal ahaan ama qoraal ahaanba, waxay si siman u heli doonaan adeegyada ay bixiyaan xafiisyada Adeegyada Ilmaha ee Franklin County. Is-afgarad karti leh waxa bixin doonaa shaqaale ka tirsan xafiiska Adeegyada Ilmaha marka kasta oo ay taasi suurta-gal tahay. Marka se taasi aanay suurta-gal ahayn, waxa lagu siin doonaa turjubaan liisan leh oo bilaash ah.

Tusmada Buug-yaraha

Waa maxay xafiiska Adeegyada Ilmaha ee Franklin County (FCCS)? . 1
Maxaan ka fili karaa xafiiska FCCS? 2
Sidee buu adiga kuu khuseeyaa sharciga "The Indian Child Welfare Act"?..... 3
Adeegyadee baa qoyskeyga caawin kara 4
Maxaa dhacaya haddii ay qasab noqoto in ilmahaygu guriga ka tagaan?..... 5
Waa maxay xuquuqaheygu?..... 6
Sidee baa xuquuqaheyga loo illaalinayaa? 10
Marka masiibo timaaddo 13

La naqtiimay Abril 1, 2013

Xasuus-qoraa

Waa maxay xafiiska Adeegyada Ilmaha ee Franklin County (FCCS)?

Hay'addeena wuxuu sharcigu siiyey awoodda ah inay baarto soo-gudbimaha (referrals) xumeynta iyo dayacaadda iyo isticmaalka mukhaadaraadka ee ilmaha. Waxaannu faragelin ku sameyn doonnaa oo qura si aannu u-hubinno ammaanka ilmaha ama aannu u caawinno qoyska xilliga uu ku jiro qalaalaasaha. Had iyo jeer annaga hadafkayagu ama goolkayagu waa inaanu si ammaan leh ilmaha ugu hayno guriga oo aannu u siinno adeegyada laga yaabo inay ka celiyaan inuu kiisku furmo. Haddii uu kiis furmo, waxaannu ku jawaabnaa saddex siyood. Haddii ilmaha si ammaan ah lagu sii hayn karo guriga, waxaannu la shaqeyn doonnaa qoyska iyadoo la isticmaalayo qorshe wadajir loo oggolaaday in lagu xalliyo mashaakilka qoyska annaga noo keenay. Marmarka qaar waxa loo baahdaa in ilmaha laga kaxeeyo guriga si aan joogta ahayn. Marka la caddeeyo in ay tahay wax aan dhici karin in si ammaan ah ilmaha dib loogu celiyo qoyska, waxay hay'addu raadin doontaa ilmo-heyn joogta ah oo waxay ilmaha u bandhigi doontaa cid kale oo qaadasho-korisa ilmaha.

Dhammaan inta uu socdo kiisku, qoysaska waxa lagu dhiiri-galiyaa inay tallooyin bixiyaan oo ay qeyb ka ahaadaan habka go'aan-gaarista ee kooxda. Qoysaska waxa si fiican loo caawin karaa marka ay iyagu naga caawiyaan aqoonsiga arrimaha iyaga ku adag iyo marka qoyska laga talo-galiyo sameynta qorshaha adeegga ee iyaga lagu caawinayo.

Ilmo kastaa waxa ku habboon inuu joogo guri deggan oo joogta ah. Joogtanimadaasi waxay noqon kartaa qaabab badan oo kala ah — dib-ugu-celinta qoyskii ilmaha dhalay, xannaanada qaraabada, cid kale oo ilmaha qaadata oo korsata, xiriir lala yeesho qoys koriye ah (foster family) iyo/ama xiriirada komuyuunatiga dhammaantood waxay ilmo dhallinyaro ah siin karaan taageero noloshiisa inta ka hartay ah.

Khadka Telefoonka Furan 24-Saac

614-229-7000

Xafiiska Adeegyada Ilmuhu wuxuu rabaa inaad iyaga wacdo haddii:

☎ Aad adigu u maleyneyso in adeegyada illaalintu ay adiga ama qoyskaaga faa'iido u noqon karaan.
☎ Aad adigu hal mar hore u heshay adeegyada illaalinta balse aad mar kale u baahan tahay.
☎ Aad adigu u maleyneyso in ilmo ama qoys kuu doono ha noqdee uu u baahan yahay adeegyada illaalinta.

-Qofka na soo wacayaa waxa uu leeyahay xaqa ah in magaciisu qarsoonaado-

Xafiiska Adeegyada Ilmuhu wuxuu raacaa mabaadii'da hagaha ah ee soo socda:

- Annagu waxaannu nahay shaqaale ku takhasusay daryeelka ilmaha;
- Annagu waxaannu sharafnaa qoysaska;
- Annagu waxaannu qiimeynnaa ilmo kasta; iyo
- Annagu waxaannu qiimeynnaa shuraakonimada ama wada shaqeynta

Maxaan ka fili karaa Xafiiska Adeegyada Ilmaha?

Shaqaalahayaga kiisasku waxay la shaqeeyaan qoysaska si ay u xalliyaan mashaakilkooda. Sharcigu waxa uu qabaa in Xafiiska Adeegyada Ilmaha uu baaro eedaymaha ku saabsan ilmo laga yaabo in la xumeeyey naftiisa, ama la daayacay ama isticmaala mukhaadaraadka, ilmahaas oo u baahan illaalin.

Wicitaanadaasi waxay inta badan ku saabsan yihiin:

- kormeer la'aan, cunto la'aan, hoy la'aan, adeeg guri (utilities) la'aan, xannaano caafimaad la'aan oo ilmaha haysata
- jir-dil ilmaha ah
- fara-xuemyn ilmaha ah
- ilmo ka baaqda inuu sare u shaaco, oo uu koro, oo uu kobco
- daayacaad xagga waxbarashada ah
- ilmo muujinaya mashaakil dabeecadeed oo aad u xun
- ilmo ka cararay guriga
- qoyska oo si xun u isticmaala daroogada ama khamriga
- Ammaanka ama illaalinta ilmaha
- ilmo dhintay

Shaqaalaha Kiiska ee Xafiiska Adeegyada Ilmuhu wuxuu adiga kuu sheegi doonaa aagaga laga walaacsan ee la soo sheegay oo wuxuu raadin doonaa haddii dhibaato ka jirto aagagaas. Taas waxa la sameyn doonaa iyadoo lala hadli doono adiga , iyo ilmahaaga, iyo dugsiga, iyo shaqaalaha takhasuska leh, iyo dad kale oo arrinta la xiriira haddii loo baahdo. Marka la eego sharciga Ohio, magaca qofka wax soo gudbiyey waa sir.

Haddii ay xaqiiqooyinka ka soo baxa baarista la sameeyey muujiyaan in aanay jirin baahi loo qabo illaalinta, annaga ayaa adiga kuu soo sheegi doona, oo waxa qasab ah in aan wax kale la sii sameynin.

Haddii ay xaqiiqooyinku muujiyaan in ay jirto baahi ah illaalin, Xafiiska Adeegyada Ilmuhu wuxuu la shaqeyn doono adiga. Shaqadan waxa loo sameyn karaa si ah heshiis inna dhex mara, ama amarro ka soo baxa maxkamadda dhallinyarada.

Adeegyada loo baahan yahay ayaa lagu tixi doonaa qorshaha kiiska ee lala sameeyey qoyskaaga iyo Shaqaalaha Kiiska. Qorshani wuxuu sheegi doonaa waxyaalaha ay tahay inay qabtaan waalidka, ilmaha, iyo hay'addu si loo sameeyo isbeddelada loo baahan yahay. Kolba marka ay isbeddelaan baahidaada ama kuwa ilmahaagu ayaa laga yaabaa in qorshahana la beddelo. Adiga waxa lagu warsan doonaa inaad saxeexdid qorshahan iyo wixii isbeddel ah ee ku yimaadda qorshaha. Adiga waxa lagu siin doonaa nuqul qorshaha kiiska ah.

Si loo casriyeeyo qorshaha oo dib-u-fiirin loogu sameeyo wixii horumar ah ee la sameeyey, ayaa Xafiiska Adeehyada Ilmaha (iyo Maxkamadda Dhallinyarada marka ay soo dhexgasho kiiska) ay qaban doonaan shirka kiiskaaga laba jeer sannadkii, Haddii uu qoyskaagu aanu oggolaanin adeegyada ama go'aan, waa in la qadaa tallaabooyin lagu xalliyo walaacyadaas (fiiri bogga 8).

Dadka lala xiriirayo

Magaca: _____

Cinwaanka: _____

Magaalada, Dawladda, 'Zip': _____

Telefoonka/'E-mail'ka: _____

Magaca: _____

Cinwaanka: _____

Magaalada, Dawladda, 'Zip': _____

Telefoonka/'E-mail'ka: _____

Magaca: _____

Cinwaanka: _____

Magaalada, Dawladda, 'Zip': _____

Telefoonka/'E-mail'ka: _____

Magaca: _____

Cinwaanka: _____

Magaalada, Dawladda, 'Zip': _____

Telefoonka/'E-mail'ka: _____

Dadka lala xiriirayo

Magaca: _____

Cinwaanka: _____

Magaalada, Dawladda, 'Zip': _____

Telefoonka/'E-mail'ka: _____

Magaca: _____

Cinwaanka: _____

Magaalada, Dawladda, 'Zip': _____

Telefoonka/'E-mail'ka: _____

Magaca: _____

Cinwaanka: _____

Magaalada, Dawladda, 'Zip': _____

Telefoonka/'E-mail'ka: _____

Magaca: _____

Cinwaanka: _____

Magaalada, Dawladda, 'Zip': _____

Telefoonka/'E-mail'ka: _____

Soo-sheege la igmaday oo qora warbixin ku saabsan xumeyn iyo daayacaad ilmo. Markuu codsado, soo-sheegaha waa in loo sheegaa dhammaan waxyaalaha soo socda:

A. Haddii uu Xafiiska PCSA uu isagu bilaabay baaritaanka iyo haddii kale.
B. Haddii uu Xafiiska PCSA sii wadayo baarista iyo haddii kale.
C. Haddii uu Xafiiska PCSA uu si kale ugu lug leeyahay ilmaha wax laga qorayo iyo haddii kale.
D. Heerka guud ee caafimaadka iyo ammaanka ilmaha wax laga qorayo.
E. Haddii ay warbixintu keentay dacwad la dhigay maxkamadda dhallinyarada ama eydeymo dembi oo laga xereeyay maxkamad kale iyo haddii kale.

Sharciga "Indian Child Welfare Act (ICWA)" waa sharci federaal ah oo raadinaya in ilmaha Hindi Ameerikaanka ah ay hayaan qoysas Hindi Ameerikaan ahi. Golaha "Congress"ka ayaa sannadkii 1978 ansixiyey sharciga ICWA si looga jawaabo tiro aad u fara badan oo ahayd ilmaha Hindi Ameerikaanka ah oo laga kaxeeyey guryahoodii oo ay ka kaxeeyeen hay'adaha dadweynaha iyo kuwa gaarka ihiba. Ujeeddada Golaha "Congress"ku waxay ahayd in sharciga ICWA "lagu illaaliyo danaha ugu fiican ilmaha Hindida ah iyo in sare loo qaado deganaanta iyo nabad-sugidda qabaa'ilka iyo qoysaska Hindida Ameerikaanka ah" (25 U.S.C. § 1902). Shaqaalaha Kiisku waa inuu sameeyaa dhowr tixgalin marka uu wax ka qabanayo kiis la xiriira sharciga ICWA, waxaana ka mid ah:

- siinta qoyska "dadaallo si firfircoon loogu hawlan yahay";
- aqoonsiga meeleyn ku habboon qodobada uu doorbidayo sharciga ICWA;
- u sheegidda qabiilka ilmaha iyo waalidka ilmaha habka heynta ilmaha; iyo
- in si firfircoon habka looga qeybgaliyo qabiilka ilmaha iyo waalidka ilmaha.

Shaqaalahaaga Kiisku waa inuu awoodo inuu idiin sharxo xuquuqdiina sharciga ICWA iyo ficilada kale ee kiiska oo uu u sharxo si sahlan oo aad fahmi kartid.

Haddii aad adigu dareensan tahay in sharciga ICWA aan si sax ah loogu dhaqmin kiiska ilmahaada, waxa qasab ah inaad la hadasho Kormeeraha Shaqaalaha Kiiskaaga. Xafiiska Xuquuqda Macmiilka (Office of Client Rights) wuxuu isna kaa caawin karaa in la hubiyo in si habboon loo dhaqangeliyo sharciga ICWA.

Adeegyadee baa qoyskeyga caawin kara?

Xafiiska Adeegyada Ilmuhu wuxuu bixiyaa adeegyo ay ka mid yihiin

- baarista xumeynta iyo daayacaadda ilmaha ah
- adeegyada illaalinta iyo maareynta kiiska
- adeegyada kureyda iyo foodleyda (ama dhallinta yaryar)
- adeegyada la-talinta ah
- adeegyada ku saleysan guriga
- adeegyada maareynta guriga
- adeegyada tabaruca
- adeegyada caafimaadka ee ilmaha
- adeegyada xoreynta iyo nolosha madax bannaan ee dhallinyarada 16 jirka ah iyo ka weyn
- adeegyada qaadasho-korista ilmaha ee dhammaan da'aha kala duwan ee ilmaha
- adeegyada isku-haynta qoyska

Wixii adeegyo taageero ah wuxuu Xafiiska Adeegyada Ilmuhu u diraa hay'adaha komuyuunatiga:

- adeegyada caafimaadka dhimirka
- Barashada waalidnimada
- qiimeynta/la-talinta daaweynta dhimirka (psychiatric) iyo saykoolajiyadda
- qiimeynta iyo daaweynta daroogada iyo aalkolada ama khamriga
- taageero ah xagga xannaanada ilmaha
- adeegyada ka caawiya korniinka caafimaadqaba ee ilmaha
- kaalmada maaddiga ama qalabka ah
- guriyeynta
- adeegyada kureyda iyo foodleyda (dhallinta yaryar) dhib badan haysto

Haddii uu xafiiska FCCS idin la shaqeynayo adiga iyo ilmahaaga marka ay masiibo timaaddo…

Marka ay dhacdo xaalad u baahan ka daadgureynta qoyskaaga ee gurigaaga ama goobtaada, waxaad fadlan isla markiiba u sheegtaa xafiiska FCCS. Haddii ay masiibadu tahay mid wada aafeysay komuyuunatiga oo dhan, waxaannu isku dayi doonnaa inaanu hirgalinno qaab aad wax noogu soo sheegi kartid baraha xiriirka ee soo socda:

xagga 'email'ka: FCCSDisaster@fccs.co.franklin.oh.us

xagga telefoonka: (614) 229-7680.

Fadlan waxaad nala soo wadaagtaa macluumaad badan intii suurtagal ah si aad nooga caawisid inaanu aqoonsanno cidda aad tahay iyo meesha aad ku noolaan doontid.

Haddii uu xafiiska FCCS adiga kaa caawinayo booqashada qoyska ama ay maxkamadi amartay booqashada qoyska, fadlan waxaad noo soo sheegtaa haddii ay booqashada qoyska ka dhici karto goobta aad joogto. Annagu waannu kula shaqeyn doonnaa adiga si aanay dib ugu dhicin booqashooyinkaasi waqtigan adag, laakiin waxaad u baahan tahay inaad adigu si joogta ah noola soo xiriirtid.

Fadlan kala soco raadyayaasha iyo telefashinada iyo warbaahinta kale wararka ka soo baxaya xafiiska FCCS.

Booqashooyinku ma dhici karaan haddii sarkaalka ammaanka (Sheriff) ku dha-waaqo heerka-2 (ama ka sarreeya) oo ah **xaalad baraf oo degdeg ah** oo ka dhacda halkan degmada Franklin County ama degmada uu ilmahaagu ku sugan yahay. Fadlan la soco Shaqaalaha Kiiskaaga ama kormeeraha Shaqaalaha Kiis-kaaga xilliga ay jirto xaaladdan cimileed ee degdega ahi. Dadaal kasta waa sameyn doonaa in la qorsheeyo booqasho kasta oo la waayey marka ay cimiladu taas oggolaato.

Habka ashkatada iyo dacwadda ee Xafiiska Adeegyada Ilmaha waxa dheer in Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoysku ee Ohio ay mas'uul ka tahay in dhammaan hay'adaha adeegyada ilmaha ee degmadu ay ku dhaqmaan xeerarka dawladda. Xafiiskaas waxaad ka wici kartaa 'Bureau of Family Services' telefoonkooda bilaashka ah 1-866-886-3537 Lambarka 4.

Xafiiska Adeegyada Ilmaha wuxuu barnaamijyada dawladda federaalka iyo gobolka ka dalbadaa in loo soo celiyo kharashkii kaga baxday adeegyada uu u sameeyo ilmaha oo sidaas darteed waxa sharci ahaan laga rabaa inuu adeegyada ilmaha u bixiyo si waafaqsan sharciyada dawladaha Federaalka iyo Gobolka. Haddii aad adigu rumeysan tahay in lagu takooray iyadoo la cuskanayo jinsiyaddaada, midabkaaga, qowmiyaddaada, naafanimadaada jireed ama maskaxeed, noocaaga lab/dheddignimo, ama si kale lagaaga takooray barnaamij, adeeg ama kaalmo uu amray ama uu bixiyey Xafiiska Adeegyada Ilmaha ee Franklin County waxaad la xiriiri kartaa adeegyada soo socda mid ka mid ah:

- Xafiiska Adeegyada Ilmaha wuxuu leeyahay Isuduwaha Xuquuqda Shicibka. Sarkaalka Xuquuqda Macmiilka (CRO) wuxuu ku takhusasy wax ka qabadka ashkatooyinka ku lug leh takoorka. Sarkaalka CRO wuxuu kaa caawin karaa oo uu tallooyin kaa siin karaa walaacyada la xiriira xuquuqaha shacabka. Sarkaalka CRO waxa laga helaa cinwaanka 855 West Mound St, Columbus, OH, 43223, oo waxa laga wici karaa lambarka 1.614.275.2621;
- Xafiiska 'Ohio Legal Rights Service', ee ku yaalla cinwaanka 8 E. Long St, 5th Floor, Columbus, Ohio 43215-2999, telefoonka bilaash lagu wici karo Gobolka oo dhan ee: 1-800-282-9181, iyo lambarka bilaashka ah Gobolka oo dhan ee loogu tala-galay dhagoolayaasha ama dadka dhagaha culus (T.T.Y.): 1.800.858.3542, Telefoonka caadiga ah ee: 1.614.466.7264; Telefoonka dadka dhagoolayaasha ah ama dhagaha culus (T.T.Y).: 1.614.728.2553, Lambarka Fagaska: 614.644.1888; iyo
- Xafiiska 'Office for Civil Rights, U.S. Dept. of Health and Human Services', ee ku yaalla cinwaanka 200 Independence Ave, S.W., Rm. 509F, HHH Bldg, Washington, D.C. 20201, telefoonka bilaashka ah ee khadka TDD line: 1.800.537.7697

Haddii aad dareemeysid inaad xaq u laheyd adeegyo aan lagu siinin waxaad iyana dacwad ka xereysan kartaa mid ka mid ah dhawr urur oo ay ka mid yihiin, balse aan ku xaddidneyn:

Guddiga Sare ee Ururka La-taliyayaasha, Shaqaalaha Bulshada, iyo Cilaajyahannada Guurka & Qoyska ee Ohio
50 West Broad St., Columbus, Ohio 43215
1.614.466.0912

Guddiga Sare ee Saykoolajiga ee Ohio,
77 S. High St.,
Columbus, Ohio 43215
1.614.466.1143

Adeegyada Middiidinimada Daroogada iyo Caafimaadka Maskaxda (ADAMH)
447 E. Broad St., Columbus, OH 43215
1.614.224.1057

Guddiga Sare Kalkaaliyayaasha Dawladda Ohio
17 S. High St., Suite 400,
Columbus, Ohio 43215
1.614.466.3947

Sarkaalka Xuquuqda Macmiilka ayaa kaa caawin kara xaggii aad ku jiheyn laheyd walaacaaga.

Maxaa dhacaya haddii ay qasab noqoto in ilmahaygu guriga ka tagaan?

Ilmaha oo dhan waxay u qalmaan inay helaan guri joogta ah. Si loo hubiyo taas, waa in ilmaha si ku meel gaar ah loogu meeleeyaa goobta ugu eg guri ee la heli karo. Goobtaas waxa ka mid noqon kara:

- guri qaraabo - tol leeyahay
- guri meeleyn ah (foster home)
- guri kooxeed
- dhisme koox ahaan loo deggan yahay oo intii la kari karo guriga ilmaha u dhow
- guriga qoys ilmaha korsanaya

Qoyskaaga waxa laga filayaa inuu si shuraako ah ula shaqeeyo Xafiiska Adeegyada Ilmaha si isaga loo xoojiyo oo dib loogu mideeyo. Sidaass waxa loo sameeyaa in ilmaha la siiyo nolol joogta ah.

Qoysaska waxa laga filayaa inay:

- wax ka caawiyaan qorista qorshaha kiiska oo ay ku jiraan adeegyada lagu gaarayo baahitirka qoyskaaga;
- siiyaan ilmaha hoy ammaan ah oo nadiif ah oo jaceyl leh;
- la kulmaan Shaqaalaha Kiiska iyo shaqaalaha kale si wixii horumar ah dib-u-fiirin loogu sameeyo;
- tagaan ama ka qeybqaataan barnaamiyada ama adeegyada ku taxan qorshaha kiiska; iyo
- tagaan dhageysiga maxkamadaha oo ay raacaan amarrada ay maxkamaddu soo saartay.

Mar kasta oo ilmaha la geliyo xannaano, Xafiiska Adeegyada Ilmaha waxa uu oggeysiiyaa Waaxda Shaqooyinka iyo Adeegyada Qoyska ee Franklin County iyo Hay'adda Dhaqangalinta Taageerada Ilmaha ee Franklin County.

Shaqaalahaaga waxaad weydiisataa inuu ku siiyo nuqul ah qoraalka "Marka Ilmahaaga Meel Kale Lagu Meeleeyo." Qoraalkaas waxa ku yaalla macluumaad badan oo arrintan ku saabsan. Ilmaha ka weyn 12, waxa loogu tala-galay qoraalka "Hagaha Xuquuqdaada & Waajibaadkaaga." Qoraalkaas waxa ku yaalla macluumaad faa'iido leh marka ay dhacdo meeleyn ka baxsan guriga.

Waa maxay xuquuqaheygu?

Xafiiska Adeegyada Ilmaha waxa ka go'an inuu suurta-galiyo deegaan ama jawi ka madax bannaan takoor iyo dhibis oo ma u dul-qaadanayo marka arrimahaas loo geysto qof iyadoo sababtu tahay qofka jinsigiisa, diintiisa, milladdiisa, midabkiisa, qowmiyaddiisa, noociisa ama lab/dheddignimadiisa, xaaladdiisa guurka, da'diisa, naafanimadiisa jireed ama maskaxeed, nooca galmadiisa, xaaladdiisa milatariga, siyaasadda uu raacsan yahay, xubinnimadiisa urur, ama dhaqdhaqaaqiisa sharciyeed.

Sharciyada dawladda Ohio iyo kuwa federaalku waxay bixiyaan illaalinno cayiman oo ah xuquuqdaada xilliga aad adeegyada ka heleyso Xafiiska Adeegyada Ilmaha ee Franklin County. Wixii su'aalo ah ee intan dheer ee la xiriira xuquuqahaaga, waxaad kala hadli karta shaqaalaha ama qof kasta oo jooga xafiiska Xuquuqda Macmiilka.

Xafiiskiisa Xuquuqda Macmiilka ee Xafiiska Adeegyada Ilmaha wuxuu abuuray qaabab dib loogu fiiriyo cabashooyinka macmiilka iyo racfaan maamuleedyada. Xafiiska Xuquuqda Macaamiilku wuxuu macmiilka u sheegaa xuquuqdooda hoos timaadda siyaasadaha hay'adda iyo xeerarka dawladda Ohio. Xafiiska Xuquuqda Macaamiilku wuxuu mas'uul ka yahay inuu hubiyo fulinta hay'adda ee xuquuqda macmiilka iyo xeerarka hababka cabashada/racfaanka. Kuwa xaqa u leh habka cabashada/racfaanka waxa ka mid ah, balse kuma xaddida, ilmaha, waalidka, xannaano-bixiyaasha qaraabada ah ama aan qaraabo ahayn, shakhsiyaadka lagu eedeeyey xumeynta ama dayacaadda ilmaha, iyo xirfadleyaasha dan weyn ku leh adeegyada shaqaaluhu bixinayaan. Xafiiska Xuquuqda Macmiilku:

- wuxuu u shaqeeyaa si ah isuduwe cabashooyin oo wuxuu bixiyaa caawimo kolba sida loogu baahdo, taas oo ay ka mid yihiin ka qeybgalka dhageysiyada cabashooyinka;
- wuxuu u shaqeeyaa si ah sarkaalka dhageysiga maamuleed ee loo qabto natiijooyinka baarista ee lagu muransan yahay;
- wuxuu warbxinnada u gudbiyaa guddiga sare;
- wuxuu warbixin siiyaa agaasimaha fulinta wixii walaacyo maamuleed iyo miisaaniyeed. Wada-hadallada khuseeya kiisas gaar ah ee lala yeesho agaasimaha fulinta waxa warbixin qoraal ah la siiyaa guddiga sare;
- lama saari karo ficil anshixin ah iyada oo aanu ansixin guddoomiyaha guddigu; iyo
- wuxuu codsan karaa in lagu daro ajandaha guddiga mar kasta oo uu xafiisku warbixin ka bixinayo xaalad kiis shakhsiyeed ama macluumaad kale oo la xiriira shaqada xafiiska Xuquuqda Macmiilka. Guddoomiyaha guddiga oo qura ayaa codsigaas diidi kara.

Xafiiska Xuquuqda Macmiilku wuxuu ku yaallaa xafiisyada maamulka ee Xafiiska Adeegyada Ilmaha ee Franklin County. Waa wax fudud la xiriirka Xafiiska Xuquuqda Macmiilka:

Boosta: 855 W. Mound St., Columbus, Ohio 43223
'E-mail'ka: cro@fccs.co.franklin.oh.us
Taleefanka: 614.275.2621
Fagaska: 614-275-2755

Racfaan waxa qaadan kara qof lagu soo magacaabay inuu yahay qof lagu eedeeyay xumeyn (abuse) ama daayacaad ilmo oo la soo xaqiijiyey ama la soo sheegay. Waxa qasab ah in racfaanka la xareeyo **soddon maalmood gudahood** marka la soo sheego natiijooyinka baarista. Haddii aad rabtid inaad racfaan ka qaadatid natiijooyinka baarista, waxaad la xiriirtaa xafiiska Xuquuqda Macmiilka (fiiri bogga 6). Racfaanka laga qaato natiijooyinka baarista ma sii socon karo illaa go'aan la gaaro qaar ama dhammaan kiisaska maxkamadeed ee la xiriira natiijooyinka. Marka la sameeyo dhammaan go'aannada maxkamadeed ee la xiriira natiijooyinka, ayuu rafcaan-qaatuhu sii wadan karaa rafcaankiisa, balse waa inuu sidaas sameeyaa soddon maalmood oo taariikhi ah gudahooda laga soo bilaabo go'aankii maxkamadeed ee u dembeeyey. Kuwa ka reeban waqtigan la cayimay waa uu bixin karaa sarkaalka dhageystaha ihi haddii uu u helo sabab fiican.

1. Racfaan maamuleed waxa lagu sameen karaan hadal ahaan, laakiin waxa qasab ah in foomka uu saxeexo qofka lagu helay inuu geystay xumeyn ama dayac ilmeed. Xirmada qoraalka ah ee racfaanka ayaa la diri doonaa taas oo ay ku jiraan foomamka iyo macluumaadka loo baahan yahay ee ku saabsan sida loo xareeyo racfaan maamuleed. Waxaad buuxisaa (xafiiska Xuquuqda Macmiilka ayaa kaa caawin kara) oo aad saxeexdaa foomka racfaan maamuleedka. Waxaad foomkaas oo ay ku lifaaqan yihiin wixii dukumenti ah ee khuseeya ee taageeraya racfaanka u soo celisaa xafiiska Xuquuqda Macmiilka. Marka la helo racfaan maamuleedka, waxa loo diri doonaa agaasimaha waaxda Qaabilka iyo Baarista (Intake and Investigation department). Waa inaad awoodid inaad la kulantid oo aad racfaankaaga ka hadashid soddon maalmood oo taariikhi ah gudahood. **Shirka loo sameeynayo talaabadan koowaad wuxuu ka dhici doonaa cinwaanka 4071 East Main Street.** Jawaabta qoran ee maamulka waxa laguu soo diri doonaa shirka ka bacdi.

2. Haddii jawaabta racfaan maamuleed aanay xalinin racfaanka, waxaad adigu la xiriirtaa xafiiska Xuquuqda Macmiilka soddon maalmood oo taariikhi ah gudahood marka aad heshid jawaabtaas. Waxa markaas racfaankaaga loo diri doonaa sarkaalka dhageysi maamuleedka ee hay'adda. Ka dib marka aad xereysato racfaanka waa inaad awoodid inaad ka qeybgashid dhageysiga soddon maalmood oo taariikhi gudahoda. **Shirka loo sameeynayo talaabadan labaad wuxuu ka dhici doonaa cinwaanka 855 West Mound Street.** Isagoo cuskanaya sabab fiican ayuu sarkaalka dhageysigu bixin karaa amar ah in kiiska la sii wado. Sarkaalka dhageysigu si toos ah uguma lug laha baarista kiiska ama ansixinta markhaati-qaadka kiiska. Dhageysiyada waxa la qabtaa muddo dhan hal saac. Waxa qasab ah in racfaan-qaatuhu uu hore ugu sheego xafiiska Xuquuqda Macmiilka waxyaalaha gaarka ah ee loo baahan yahay in loogu talogalo. Racfaan-qaatuhu wuxuu keensan karaa looyar/qareen iyo marqaatiyaal bixin kara marag-kac khuseeya arrinta. Hadalka dhageysiga waa la duubi doonaa. Sarkaalka dhageysigu wuu ka saari karaa dhageysiga qof kasta oo u dhaqma si ixtiraam la'aan ah. Dhammaan dhinacyada markhaatiga bixinaya waa la dhaarin doonaa. Sarkaalka dhageysigu wuxuu soo qaddimi doonaa warbixin qoraal ah muddo 30 maalmood oo taariikhi ah gudahood marka la qabto dhageysiga. Go'aanka sarkaalka dhageysiga waa xalka ugu dembeeya ee uu bixiyo Xafiiska Adeegyada Ilmaha ee Franklin County.

FIIRO GAAR AH: *Dhageysiyadu maaha fadhiyo sharciyeed, sidaas darteed laguma dabiqi karo xeerarka caddeymaha. Diiwaanka baarista ee Adeegyada Ilmahaaaha waa sir sida uu sharcigu qabo oo lama siin doono ama lalama wadaagi karo racfaan-qaataha ka hor, markuu socdo ama markuu dhammaado dhageysigu.*

Guddiga Adeegyada Ilmaha ee Franklin County waxa ay go'aamiyeen in dadka waaweyn iyo ilmaha macmiilka u ah Hay'addu ay lahaan doonaan xuquuqaha ah:

1. adeegyo turjubaan oo bilaash ah oo macmiilka la siiyo mar kasta oo ay codsadaan si macmiilka looga caawiyo dhammaan xiriiryada uu la yeesho shaqaalaha Xafiiska Adeegyada Ilmaha, oo ay ka mid yihiin dhammaan shirarka, qorsheynta kiiska iyo xiriirada lala yeesho shaqaalaha Hay'adda;
2. in loola dhaqmo si dareen u leh dhaqankooda oo leh tixgalin iyo ixtiraam ah xagga sharafta, madaxbannaanida, iyo gaarnimada shakhsiyeed;
3. adeeg lagu bixiyo meesha la awoodi karo ee ugu xaddidaadda yar ee ugu naxariista aadami badan. Waxyaalahaasi waxay ku qeexan yihiin sharciga iyo xeerka dawladda Ohio ama qorshaha kiiska/adeegga;
4. dib-u-fiirin diiwaanka kiiskooda illaa xad inta aannu sharcigu diideynin in la fiiriyo. Codsiga macluumaadka waa la diidi karaa haddii macluumaadka la codsaday uu khatar xooggan oo waxyeello ah u keeni karo qof kasta. Dhammaan codsiyaasha fiirinta diiwaannada kiiska waa in lagu soo gudbiyaa qoraal ahaan. Dadka codsanaya macluumaad waa inay keenaan aqoonsi sawir leh ka hor inta aan loo oggolaanin fiirinta diiwaankooda. Haddii uu jiro macluumaad uu mamnuucay sharcigu ama khatar xooggan oo waxyeello ah ku keeni kara qof kasta oo diiwaanka ku jira, macluumaadkaas waa laga saarayaa diiwaanka ka hor inta aan adiga laguu oggolaan fiirinta.

Haddii uu kiiskaagu furan yahay ka soo jawaabista codsiga fiirsashada waxa ka mas'uul ah agaasimaha gobolka. Macmiilku wuxu guudmar ku sameyn karaan diiwaankiisa isaga oo uu la joogo shaqaale ka tirsan hay'addu meel ka mid ah xafiiska FCCS.
Haddii kiiskaaga la xiray fadlan waxaad la xiriirtaa Richard Reynolds oo ka tirsan waaxda Sharciga. Lambarkiisu waa 614-275-2584. Macluumaadka la siinayo dadka codsanaya macluumaad ku saabsan kiis la xiray waxa macluumaadkaas si toos ah loogu diri doonaa qofka codsadaha ah.

Go'aanka in macmiilka loo diido fiirinta diiwaanka waxa lagu sameyn doonaa qoraal ahaan oo waxa adiga lagugu siin doonaa waraaq ahaan.

5. inay weer kasta dhexgalin karaan diiwaanka kiiskooda oo ay dib-u-fiirin karaan weero kasta oo uu bixiyo shaqaalaha Hay'addu isagoo ka jawaabaya weerta macmiilka;
6. inay helaan fursad ay kaga qeybgalaan abuuritaanka qorshaha kiiska oo la siiyo nuqul ah qorshaha kiiska iyo lifaaqyada qorshaha kiiska, iyo adeegyada la soo jeediyey ama kuwa hadda jira, cilaajka ama daaweynaha; caafimaadka jirka iyo kan dhimirka, iyo baahiyaha bulsho iyo dhaqaaleed, iyo waxyaalaha qeexa sida loo helo oo ay u habboon yihiin oo ay kaafi u yihiin adeegyada si toos ah loo bixin doono ama lagu bixin doono si u-diris ah (referral);
7. inay oggolaadaan ama ay diidaan adeeg kasta, cilaaj kasta, ama daaweyn kasta marka si buuxda loogu sharxo cawaaqibka la filan karo inay ka yimmaadaan oggolaashahaas ama diidmadaas haddii macmiilka inuu ka qeybgalo adeegga aanay maxkamadi si toos ah ugu soo amrin ama yahay qorshe kiis/adeeg ay diiwaangalisay maxkamad ka mid ah xafiis maxkamadeed oo awood u leh;

→

Sidee baa xuquuqaheyga loo sii illaalinayaa?

Xereynta Dacwadda

Dacwadi waa ashkato rasmi ah oo ku saabsan adeegyada ama la'aantooda. Xereynta dacwaddu waa inay ahaataa mid lagu sameeyey waqtigii habboonaa. Dacwad waxa la xereyn karaa soddon maalmood oo taariikhi ah ka bacdi marka ay wax dhacaan, ama dhacdo la oggaado. Waxaad la xiriirtaa xafiiska Xuquuqda Macmiilka (614-275-2621) haddii aad qabtid wax su'aalo ah.

Xalinta walaaca waxa ay qaadan kartaa qaabab kala duwan: la-shaqeynta kooxda adeegga, kaaliyaha agaasimaha; ama si dhexdhexaadin ah. Haddii aan walaacyadaada lagu xalinin isticmaalka qaababkaas, waxa la xereyn karaa dacwad. Waxa adiga laguu soo diri karaa xirmo qoraal dacwadeed ama waxaad buuxsan kartaa foomka dacwadda ee ku yaalla boggan internetka: http://www.franklincountyohio.gov/children_services/programs/client-rights-officer.cfm

1. Marka dacwadda la helo waxa loo diri doonaa agaasimaha waaxda ay arrintaasi khuseyso. Wakiil ka socda xafiiska Xuquuqda Macmiilka ayaa waxa laga yaabaa inuu ka qeybgalo shirarka haddii uu codsado dhibeysanuhu ama maamulaha waaxdu. Waxa qasab ah inaad adigu la kulmi kartid oo aad la hadli kartid agaasimaha soddon maalmood oo taariikhi ah guddahood marka dacwadda la xereeyo. Agaasihaha ayaa adiga kula soo xiriiri doona si loo qabto waqtiga shirka. Waxa qasab ah in adiga laguu soo diro jawaabta qoran ee agaasimaha muddo soddon maalmood oo taariikhi ah ka bacdi marka uu helo dacwaddaada.

2. Haddii jawaabta agaasimaha ay tahay mid aadan ku qancin, waxaad la xiriirtaa xafiiska Xuquuqda Macmiilka soddon maalmood oo taariikhi ah gudahooda ka bacdi helitaanka jawaabtaas. Dacwaddaada waxa loo diri doonaa xubin ka mid ah golaha fulinta ee Xafiiska Adeegyada Ilmaha ee Franklin County. Isla marka dacwadda/racfaanka lagu xereeyo heerkan, waa inaad awoodid inaad la kulmi kartid ama aad la hadli kartid xubinta golaha fulinta soddon maalmood oo taariikhi ah gudahooda. Muddo dhan toban maalmood oo ah maalmahala la shaqeeyo waxa qasab ah in dhageysiga la muddeeyo.

3. Haddii jawaabta xubinta golaha fulintu aanay xilliyin dacwaddaada, waxaad la xiriirtaa xafiiska Xuquuqda Macmiilka muddo dhan soddon maalmood oo taariikhi ah gudahood marka la helo jawaabtaas. Markaas waxa dacwaddaada loo diri doonaa xafiiska fulinta ee Xafiiska Adeegyada Ilmaha ee Franklin County. Isla marka dacwadda la xereeyo, waa inaad awoodid inaad la kulmi kartid ama aad la hadli kartid agaasimaha fulinta soddon maalmood oo taariikhi ah gudahooda. Muddo dhan toban maalmood oo ah maalmaha la shaqeeyo gudahood waxa qasab ah in dhageysiga la muddeeyo. Waxa qasab ah in adiga laguu soo diro jawaabta agaasimaha fulinta muddo dhan toban maalmood oo ah maalmaha la shaqeeyo gudahood ka bacdi marka dhageysiga la qabto.

8. qorshe kiis/adeeg oo shakhsiyadeed oo qoran oo hadda ah oo wax ka qabanaya ammaanka ilmaha;
9. ka qeybgal firfircoon oo xog ogaal ah xagga diyaarinta iyo dib-u-fiirinta xilliyeed, iyo qiimeynta qorshaha kiiska/adeegga;
10. ka madax bannaan daaweyn aan loo baahneyn ama xad dhaaf ah;
11. ka madax bannaan xirniin ama faquuq xad dhaaf ah;
12. in loo sheego oo uu diidi karo hab daaween ah oo aan caadi ahayn ama khatar ah;
13. ka qeybgalka adeeg Hay'adeed oo habboon oo la heli karo xitaa haddii uu diido mid ama ka badan adeegyada ama daaweynta ama cilaajyada kale ama xitaa haddii ay timi dib-u-dhac ku yimaadda daaweyn hore loo sameeyey sidaas ama adeeg kale, haddii aanay jirin baahi gaar ah oo sax ah taas oo reebeysa oo/ama qasbeysa ka qeybgalka macmiilka ee adeegyo kale. Baahidaas waxa loo sharxi doonaa macmiilka oo waxa lagu qori doonaa qorshaha kiiska/adeegga ee macmiilka;
14. ay leeyihiin fursad ah inay la tashadaan takhasuse cilaaj oo madax bannaan ama qareen sharciyeed oo uu qofku ku qabsanayo lacagtiisa;
15. sir-heynta ah illaa inta ay xaddideen oo ay amreen sharciyada iyo xeerarka dawladda Ohio iyo federaalka, ama amarada maxkamadda, ama qorshe kiis/adeeg diiwaansan. Qof kasta oo leh awood sharci inuu oggolaado sii-deynta macluumaad khuseeya maclmiilka Hay'adda wuxuu sidaas sameyn karaa isagoo raacaya sharciyada iyo xeerarka dawladda Ohio iyo tan federaalka;
16. in hore loogu sii sheego sababta ama sababaha loo joojiyey adeeg oo laga qeybgaliyo qorsheynta arrintaas;
17. in ay helaan sharraxaad ah sababaha loogu diiday adeeg;
18. in aan laga takoorin siinta adeeg iyadoo lagu saleynayo qofka dhaqankiisa, jinsiyaddiisa, da'diisa, diintiisa, midabkiisa, nooca galmadiisa, naafanimadiisa jireed ama maskaxeed, qowmiyaddiisa, heerka dhaqaalihiisa, ama siyaasadda uu raacsan yahay;
19. inay yaqaanaan qiimaha adeegyada;
20. in si buuxda loogu sheego xuquuqdooda oo dhan;
21. inay ku dhaqmaan qeyb ama dhammaan xuquuqda iyada oo aan wax aar-goosi ihi uga imanin, kuwaas oo ay ka mid yihiin helitaanka adeegyada oo ay qasab tahay inaan wax loo dhimin;
22. inay xareysan karaan dacwad; iyo
23. in la siiyo tusaalayaal hadal iyo qoraal ah oo ku saabsan dacwad xereynta.
24. inaad heshid caawimo ah xagga warbixinta kaarka amaahda, haddii aad tahay 16 jir am ka weyn oo ay ku hayso hay'addani.

waxyaalo khuseeya ilmaha ku jira xannaanadayada

Shaqaalaha Xafiiska Adeegyada Ilmaha, waalidka ilmaha koriya (foster), iyo waalidka ilmaha qaata ee korsada (adoptive) ee haya ilmo la meeleeyey ka hor qaadasho-korshada waxa lagu tababaraa sidii ay wax uga qaban lahaayeen dabeecad-xumi ama camal-xumi faraha ka baxday. Shaqaalaha iyo xannaano bixiyaashu waa in aanay isticmaalin ka-hortagyo wax xaddidda oo ah maareynta dabeecadda kuwaas oo ay ka mid yihiin: qabashooyinka gacmeed ama makiinadeed ama kiimikeed, ama faquuqid ama ku xiridda meel gooni ah.

Shaqaalaha Xafiiska Adeegyada Ilmaha, waalidka ilmaha koriya, iyo waalidka ilmaha qaata ee korsada ee haya ilmo la meeleeyey ka hor qaadasho-korshada waa in aanay:

1. Faafreebin/qarin ama furin waraaqaha u imanaya ama ka baxaya ilmaha ku jira gacanta Hay'adda haddii:
- **a.** aan lagu tuhmin inay ku jiraan waxyaalo aan la oggoleyn, ama khatar ah ama aan sharci ahayn, markaasna waxa lagu hor furi karaa shaqaale la cayimay marka ay joogaan,
- **b.** helidda iyo diridda waraaqaha aan la furin aan lagu diiddin qorshaha adeegga marka laga reebo 'e-mail'ka, ama
- **c.** ka helidda ama u dirista waraaqaha ee qof gaar ah ay khatar xooggan u tahay ammaanka ilmaha ama waalidka ilmaha loo dhiibay ama ay taasi ka soo horjeeddo danaha ilmaha isla markaana dadka iyo sababaha loo sameeyey faafreebka/qarinta waraaqaha lagu qoray diiwaanka kiiska.

2. Xaddidin xaqa ilmaha ku jira gacanta Hay'addu uu u leeyahay ku hadalka telefoonka oo gaar ah haddii aanay xaddidaadaasi ahayn mid:
- **a.** ku saleysan diidmo lagu qoray qorshaha adeegga taas oo la xiriirta ammaanka ilmaha, waalidka ilmaha koriya ama shaqaalaha, ama aanay ahayn danta ugu fiican ee ilmaha, iyo haddii,
- **b.** hore loogu oggolaaday oo ay bil kasta dib u fiiriyaan Agaasimaha Gobolka ama qof kaloo habboon oo loo igmaday,
- **c.** uu dib u fiiriyey Kormeeraha Shaqaalaha Kiiska ee ilmaha ku qoran, oo
- **d.** oggolaashaha iyo dib-u-fiirimaha lagu qoro diiwaanka kiiska,
- **e.** ama uu daba-socdo amar gaar ah oo maxkamadeed.

Xafiiska Xuquuqda Macmiilka ayaa kaa caawin kara inaad dacwad xareysato haddii aanad ku qanacsaneyn adeegyada. Adigu waxaad xareysan kartaa dacwad **kama dembeyn soddon maalmood oo taariikhi ah ka bacdi marka ay wax dhacaan, ama dhacdada la oggaado.** Si walaac wax looga qabto waxaad la xiriirtaa xafiiska Xuquuqda Macmiilka (fiiri bogga 6).
Xafiiska Xuquuqda Macmiilka ayaa kaa caawin kara inaad xereysato rafcaan maamuleed oo aad ka qaadaneyso natiijooyin baaritaan. Adigu waxaad xareysan kartaa rafcaan **kama dembeyn soddon maalmood oo taariikhi ah ka bacdi marka aad oggaato natiijada baaritaanka.** Si aad u xereysato racfaan, waxaad la xiriirtaa xafiiska Xuquuqda Macmiilka (fiiri bogga 6).

Kuwa ay kiiskooda hayaan hay'adda 'Permanent Family Solutions Network (PFSN)' ama hay'adda 'National Youth Advocate Program (NYAP)', oo ah laba hay'adood oo qoysaska iyo ilmaha si toos ah u siiya adeegyo illaalineed oo ay qandaraas ku soo qaateen, hay'adahaasi waxay leeyihiin qaabkooda u gaarka ah ee ay wax uga qabtaan cabashooyinka iyo walaacyada.Waxa adiga lagugu dhiiri-galinayaa inaad walaacaaga la xaliso Shaqaalaha Kiiskaaga ama kormeeraha. Haddii aad sidaas sameyn kari weydo, fadlan waxaad la xiriirtaa Sarkaalka Xuquuqda Macmiilka ee u adeegaya kiiskaaga.